Faallo Qoto-dheer: SDP.F20.03

SOMALI DIALOGUE PLATFORM

09 Sebteembar 2022

# Xulashooyinka awood qeybsi ee nidaamka federaalka Soomaaliya

Somali Public Agenda

# Dulmar

Soomaaliya waxa ay qaadatay nidaamka federaalka sanadii 2004 markaasoo la dhisay dowlad kumeelgaar ah. Nidaamkan ayaa noqday mid asaaskiisa la ad-keeyay sannadkii 2012 kadib markii la ansixiyay Dastuurka Federaalka Kumeel-gaarka, kaasoo caddeeyay meelo badan oo xasaasi ah oo ku saabsan nidaamka maamul ee Soomaaliya. Mabda' ahaan, hirgelinta nidaamka federaalka waxa uu ahaa mid lagu doonayo in lagu xakameeyo colaadda, iyadoo la dareemayay in dib-u-qeybinta  awoodda iyo kheyraadka dhaqaale oo Muqdisho laga fo-geeyo loona daadejiyo gobollada ay uga dhignaan karto dhinacyada colaadda isku haya in ay yareeyaan tartanka loogu jiro awoodda ee caasimadda. Fikirka federaalku waxaa la dhihi karaa waxa uu sahlay xiriir iskaashi oo ka dhexeeya Soomaalida, wuxuuna abuuray wada shaqeynta dowladda dhexe ee Muqdisho fadhigeedu yahay iyo dowlad-goboleedyada dhisnaa, sida Puntland. Lagasoo bilaabo sanadkii 2012, kadib ansixintii Dastuurka Federaalka Kumeelgaarka, waxaa sidoo kale suuragashay dhismaha Dowlad-goboleedyo, taasoo gobollada u abuurtay qaab-dhismeed ay kula xiriiraan dowladda dhexe.[1]

Inkastoo uu horumarkan jiro, dhinacyo badan oo kamid ah hannaanka feder-aalka Soomaaliya ayaan weli qeexneyn, gaar ahaan awood qeybsiga heerarka kala duwan ee dowladda. Arrinka awood-qeysiga ayaa xuddun u ah nidaamka federaalka, maadaama la qeexayo heerka awoodda dhabta ah ee dib looga celinayo dowladda dhexe. Ilaa hadda ma jiro wax heshiis ah oo ay Soomaalidu ka gaareen arrintan, iyadoo dastuurka federaalka kumeelgaarka uu bixinayo oo keliya tilmaamahaan soo socda oo iska hor imaanaya oo ku saabsan awood qeybsiga:

- **Qodobka 54-aad** waxa uu dhigayaa afar awoodood oo gaar u ah dowladda federaalka ee Soomaaliya: 1) arrimaha dibadda; 2) difaaca qaranka; 3) jin-siyadda iyo socdaalka; iyo 4) siyaasadda lacagta. Kalmadaha dambe ee qodobkan waxay sheegayaan in qeexitaan dheeraad ah oo ku saabsan qoondeynta awoodda iyo kheyraadka ay dib uga wada xaajoon doonaan mustaqbalka dowladda federaalka ee Soomaaliya iyo dowladaha xubnaha ka ah, taasoo ka dhigeysa habka awood-qeybsiga gebi ahaanba mid aan qeexneyn.

- **Qodobka 53-aad (1)** wuxuu jahawareerinayaa arrimaha ku xusan qodobka 54-aad isagoo dhigaya in dowlad goboleedyada lagala tashado: 1) kaalmada dibadda; 2) ganacsiga; 3) heshiisyada caalamiga ah; iyo 4) arrimaha kale ee khuseeya. Waxa laga wada tashanayo weli lama caddeyn, ama lagama heshiin.

- **Qodobka 52-aad** waxa uu tixayaa toban awoodood oo ay wadaagayaan dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada, kuwaasoo loo fahmi karo in ay yihiin 'awoodo wadaag ah'. Awoodahan ayaa inta badan ka dhex muuqda nidaamka federaalka, marka la isku raaco in loo baahan yahay wadashaqeyn dhex marta heerarka kala duwan ee dowladda ee dhinacyada qaarkood, sida beeraha, caafimaadka iyo waxbarashada.[2]

Marka lasoo koobo, dastuurka federaalka kumeelgaarka ayaa ku guuldarrey-stay in uu qeexo in badan oo kamid ah sida awoodda loogu qeybinayo heerarka kala duwan ee dowladda. Hannaan dib-u-eegis dastuurka ayaa la billaabay sanadkii 2012 si loo xalliyo gaabisyadaan oo loo helo faham weyn iyo heshi-

1 Dowlad-goboleedyadan weli ma aanu ansixinin baarlamaanka sida uu farayo Dastuurka Federaalka Kumeelgaarka.

2 Liiska awoodahan oo dhameystiran waa: 1) kheyraadka biyaha; 2) beeraha; 3) xanaanada xoolaha; 4) daaqa iyo keymaha; 5) ka hortagga nabaad-guurka iyo ilaalinta deegaanka; 6) caafimaadka; 7) waxbarashada; 8) xiriirka iyo wadahadalka madaxda dhaqanka, iyo ilaalinta iyo horumarinta xeer dhaqameedka; 9) xiriirka culimada diinta; iyo 10) dhallinyarada.

is la isku raacsan yahay oo ku saabsan nidaamka federaalka ee Soomaaliya. Inkastoo horumar farsamo oo muhiim ah laga gaaray in miiska lasoo saaro xulashooyin, haddana wada-hadalladii siyaasadeed ee lagama maarmaanka u ahaa in la gaaro heshiis la isku raacsan yahay oo ku saabsan nidaamkaan ayaa maqan. Waxaa intaa dheer, waxaa cad in awood qeybsiga aysan ahayn mushkilad farsamo oo keliya, balse ay tahay arrin siyaasadeed oo la isku hayo, madaama Soomaalidu aad ugu kala aragti duwan tahay macnaha federaalka uu dalka u leeyahay, iyadoo ay dadku isugu jiraan kuwo raba hannaan federaal oo ay awoodda dowladda dhexe aad u sarreyso iyo kuwo raba nidaam federaal oo ay awoodda aad u baahsan tahay.

Maqnaanshaha heshiis ku saabsan qeybsiga awoodaha ayaa sabab u noqday khilaaf iyo xiisado u dhexeeya heerarka kala duwan ee dowladda, gaar ahaan dowladda federaalka Soomaaliya iyo dowlad goboleedyada. Bishii Oktoobar 2017, tusaale ahaan, muranno ka dhashay xiriirka arrimaha dibadda ee Soomaaliya – oo aanu dastuurka federaalka kumeelgaarka ah caddeyneynin – ayaa keenay khilaaf kadib markii shanta dowlad goboleed ay dhiseen Golaha Iskaashiga Dowlad Goboleedyada, kahor inta aanay hakin xiriirkii ay la lahaayeen dowladda federaalka sanadkii xigey. Meelaha kale oo ay ka jirtay xiisadda la xiriirta awood-qeybsiga waxaa kamid ahaa arrinta ku saabsan qeybinta deeqaha caalamiga ah iyo doorka dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada ee waxbarashada. Xiisadaha noocaan oo kale ah ayaa gacan ka geystay hardanka u dhexeeya dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada. In si cad loo qeexo awood qeybsiga hannaanka federaalka ee Soomaaliya waa mudnaan muhiim ah marka ay timaaddo horumarinta hiigsiga dalka ee colaadaha kadib.

Si taas loo gaaro, wadahadal siyaasadeed oo macno leh oo loo dhan yahay oo ku saabsan awood qeybsiga waa lama huraan. Sidaas daraadeed, faalladan waxay qeexaysaa qaab-dhismeedka lagu falanqeynayo arrinta, iyo sidoo kale fursadaha jira ee lagu bilaabi karo wadahadal ku saabsan hababka siyaasadeed ee khuseeya. Faalladan waa qeyb kamid ah cilmibaarisyo taxane ah oo soo bandhigaya xulashooyin ku saabsan arrimaha muhiimka ah ee la xiriira iyo madmadowga ku jira heshiiska siyaasadda Soomaaliya. Arrimaha muhiimadda gaarka ah u leh moqduucan waa faallooyinka Platform-ka ee falanqeynaya federaaleynta maaliyadda iyo naqshadda amniga. Faallooyinkan ayaa la sameeyay iyadoo lala tashanayo khubaro farsamo oo kala duwan iyo dad saameyn ku leh siyaasadda oo qeyb ka ahaa hindisaha 'F20' ee Platform-ku qabtay, kulamadaasoo si wada jir ah u baaray xalalka arrimaha muranku ka jiro ee heshiiska siyaasadda Soomaaliya. Faalladan waxaa loogu talagalay in ay afkaar ku biiriso siyaasad-dejiyeyaasha Soomaaliyeed iyo dadweynaha muddo xileedkan siyaasadeed, iyadoo u oggolaanaysa inay dib u galaan wadahadal waxtar leh oo ku saabsan arrintan.

# Qaab-dhismeedka falanqeynta

Qeybtan soo socota, saddex xulasho oo waaweyn oo loo qaabeyn karo awood qeybsiga heerarka kala duwan ee dowladda Soomaaliya ayaa lagu qeexay:

1. **Mid Dhexe:** Awoodo badan oo loo qoondeeynayo dowladda federaalka.

2. **Mid baahsan:** Dowlad-goboleedyada inta badan waxay ka madaxbannaan yihiin dowladda dhexe.

3. **Mid daadegsan:** Awoodo isku dheeli tiran oo ay heystaan dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada, iyo sidoo kale dowladaha hoose.

Awoodaha dowladda waxaa loo qeybinayaa shan qeybood oo muhiim ah si loo helo qaab lagu falanqeeyo qeybsiga awoodaha xaalad kasta. Inkastoo aanay awoodaha oo dhan soo koobeynin, haddana awoodahan waa awoodaha muhiimka ah ee loo baahan yahay in loo qoondeeyo qeyb kamid ah heerarka dowladda ee hannaanka federaalka ee Soomaaliya:

1. **Awoodaha guud:** Waa awoodaha muhiimka ah, sida siyaasadda arrimaha dibadda iyo ganacsiga caalamiga ah.

2. **Awoodaha dhaqaale**: Waxaa kamid ah arrimaha muhiimka ah ee maamulka maaliyadda iyo siyaasadda dhaqaalaha, sida siyaasadda lacagta; nidaaminta ganacsiga gudaha iyo dibadda; siyaasadda iyo nidaaminta qeybaha muhiimka ah – sida beeraha, tamarta iyo dhismaha – iyo maamulka kheyraadka qaranka, sida dhulka, biyaha, saliidda iyo gaaska, iyo kalluumaysiga.

3. **Amniga iyo cadaalada**: waxaa kamid ah difaaca qaranka, booliska, iyo cadaaladda.

4. **Kaabayaasha dhaqaalaha:** Waxaa kamid ah gaadiidka dadweynaha, gaadiidka waddooyinka iyo badda, duulista, iyo isgaarsiinta.

5. **Adeegyada bulshada:** Gaar ahaan siyaasadda/adeegyada caafimaadka iyo waxbarashada.

Mid kasta oo kamid ah xulashooyinka lagu tilmaamay faalladan waxay qeexayaan doorka heer kasta oo dowladeed uu ciyaari doono, iyadoo la adeegsanayo qeybaha soo socda:

1. Dowladda Federaalka Soomaaliya

2. Dowlad-goboleedyada

3. Dowladaha Hoose

4. Awoodaha wadaagga

Iyadoo la adeegsanaayo qaab-dhismeedkan, faalladan waxay qeexaysaa fursadaha kala duwan ee awood qeybsiga Soomaaliya iyadoo la tixgelinayo faa'iidooyinka iyo cilladaha xulasho kasta.

# Xulashooyin

## Xulashada 1-aad: Mid dhexe

Xulashadan, awoodo badan ayaa loo qoondeeyay dowladda federaalka, iyadoo awoodaha muhiimka ah ay yeelaneyso dowladda Muqdisho. Waxaa jiri doona awood yar oo u haraya dowlad-goboleedyada iyo awoodo aad u yar oo loo qoondeeyay dowladaha hoose. Nooc kale ee xulashadan ah waxay ku lug yeelan kartaa dowladaha hoose inay qaataan awoodo badan oo loo qoondeeyay dowlad-goboleedyada, taasoo sii yareynaysa doorka dowlad-goboleedyada ee nidaamka maamulka Soomaaliya.

| | Federal | State | Local | Concurrent |
|---|---|---|---|---|
| **Awoodaha guud** | Siyaasadda arimaha dibadda<br><br>Doorashooyinka qaranka<br><br>Doorashooyinka dowlad-goboleedyada iyo dowladaha hoose<br><br>Siyaasadda dhulka qaranka | Siyaasadda dhulka ee heer dowlad-goboleed | Taageerida maareynta khilaafka dhulka la xiriira | Ma jiraan |
| **Awoodaha dhaqaalaha** | Siyaasadda lacagta<br><br>Qorsheyaasha iyo siyaasadaha dhaqaalaha qaranka<br><br>Uruurinta dakhliga ee saldhigyada cashuuraha intooda badan<br><br>Nidaaminta ganacsiga dowlad goboleedyada iyo dibadda<br><br>Nidaaminta qeybaha muhiimka ah sida beeraha | Dhaqangelinta qorshayaasha iyo siyaasadaha dhaqaalaha qaranka<br><br>Uruurinta dakhliga saldhigyada canshuuraha qaarkood iyadoo lagu saleynayo siyaasadda dowladda federaalka | Fulinta qorshayaasha iyo siyaasadaha dhaqaalaha qaranka<br><br>Uruurinta dakhliga saldhigyada canshuuraha qaarkood iyadoo lagu saleynayo siyaasadda dowladda federaalka | Ma jiraan |
| **Kaabayaasha dhaqaalaha** | Nidaaminta iyo maamulka hawada, badda iyo gaadiidka waaweyn<br><br>Nidaaminta isgaarsiinta iyo tiknoolojiyadda | Maareynta shabakadaha waddooyinka ee maxalliga ah | Ma jiraan | Ma jiraan |
| **Amniga iyo cadaaladda** | Difaaca qaranka, booliska, iyo cadaaladda<br><br>Maxkamadda sare iyo maxkamadda dastuurka | Booliiska dowlad-goboleedka<br><br>Maxkamadaha racfaanka iyo maxkamada darajada 1-aad | maxkamadda darajada 1-aad<br><br>Isku xirka arrimaha amniga | Ma jiraan |
| **Adeegyada bulshada** | Siyaasadda caafimaadka iyo waxbarashada qaranka (sida manaahijta)<br><br>Maareynta adeegyada tacliinta sare<br><br>Siyaasadaha qaranka ee barakaca iyo dib-u-dejinta | Maamulka xarumaha caafimaadka iyo adeegyada waxbarashada ee aan ahayn tacliinta sare<br><br>Bixinta adeegyada biyaha, iyo nadaafadda<br><br>Bixinta adeegyada hooy-siinta | Kormeerka bixinta caafimaadka, waxbarashada iyo adeegyada kale<br><br>Taageeridda isu-duwidda bixinta adeegyada | Ma jiraan |

### Faa'iidooyinka suurtagalka ah:

- Wuxuu noocan oggolaanayaaa horumarinta siyaasad mideysan oo midaysan si looga jawaabo dhibaatooyinka jira, sida horumarinta dhaqaalaha iyo wax ka qabashada xaaladaha bini'aadantinimada.

- Wuxuu caddeeynayaa arrimaha xasaasiga ah — sida siyaasadda arrimaha dibadda iyo difaaca, kuwaasoo inta badan loo arko in ay lahaato dowladda dhexe.

### Dhaliilaha suurtagalka ah:

- Waxa uu ka hor imanayaa mabda'a ku xusan qodobka 50-aad ee dastuurka oo ah in heerka dowladnimo ee ugu dhaw dadweynaha, intii suurtogal ah, uu masuul ka yahay bixinta adeegyada. Guud ahaan, dowladaha hoose iyo dowlad-goboleedyada waxay noqon karaan kuwo aad uga jawaaba mudnaanta iyo baahiyaha muwaadiniinta.

- Waxay niyad jebineysaa wada shaqeynta iyo iskaashiga heerar kala duwan ee dawladeed maadaama ay xulashadan xaddideyso tirada awoodaha loo aqoonsan karo awoodo wadaag ah.

- Waxa laga yaabaa in aanu noqon xulasho siyaasad ahaan shaqeyn karta sababtoo ah kalsooni darrada ay ku qabaan dowladda dhexe dadweynaha iyo siyaasiyiinta kadib taariikhda kali-taliska ah ee Soomaaliya. Waxa kale oo laga yaabaa inay kordhiso tartanka loogu jiro awoodaha heer federaal, taasoo kordhineysa khilaafka.

## Xulashada 2-aad: Mid baahsan

Xulashadan, dowlad-goboleedyada waxay inta badan ka madax bannaan yihiin dowladda dhexe. Dowlad-goboleedyada waxay yeelan doonaan awoodo badan oo ay isticmaalaan, halka dowladda federaalka ay yeelan doonto awoodo xaddidan. Dowladaha hoose waxay sidoo kale yeelan doonaan awoodo gaar ah, halka awoodo badan ay noqon doonaan awoodo wadaag ah, taasoo kordhineysa iskaashiga ka dhexeeya heerarka kala duwan ee dowladda.

| | Dowladda federaalka | Dowlad-goboleedyada | Dowladaha hoose | Awoodaha wadaagga |
|---|---|---|---|---|
| Awoodaha guud | Go'aaminta arrimaha jinsiyadda iyo socdaalka<br><br>Xisbiyada qaranka | Siyaasadda dhulka ee heer dowlad goboleed<br><br>Doorashooyinka dowlad-goboleedyada iyo dowladaha hoose | Taageeridda maareynta khilaafka dhulka | Siyaasadda arimaha dibadda<br><br>Doorashooyinka qaranka |
| Awoodaha dhaqaalaha | Siyaasadda lacagta<br><br>Dhaqaalaha iyo siyaasadda qaranka<br><br>Uruurinta dakhliga ee saldhigyada cashuuro xaddidan | Horumarinta qorshayaasha dhaqaalaha iyo miisaaniyadaha dowlad-goboleedyada<br><br>Uruurinta dakhliga cashuurta badankeeda<br><br>Nidaaminta qeybaha muhiimka ah, sida beeraha iyo tamarta | Hirgelinta qorshayaasha iyo siyaasadaha dhaqaale ee dowlad-goboleedyada<br><br>Uruurinta dakhliga saldhigyada cashuuraha qaarkood si waafaqsan siyaasadaha dowlad-goboleedyada | Xeerarka ganacsiga dibadda iyo ganacsiga u dhexeeya dowlad-goboleedyada |
| Kaabayaasha dhaqaalaha | Nidaaminta iyo maamulka gaadiidka cirka iyo badda | Nidaaminta gaadiidka dadweynaha, waddooyinka dowlad-goboleedyada iyo nalalka waddooyinka | Ma jiraan | Nidaaminta isgaarsiinta iyo tiknoolojiyadda<br><br>Maareynta shabakadaha wadooyinka |
| Amniga iyo cadaaladda | Difaaca qaranka iyo booliska<br><br>Maxkamadda sare iyo maxkamadda dastuurka | Booliiska dowlad-goboleedyada iyo amniga gudaha<br><br>Maxkamadaha racfaanka | Isku-xirka arrimaha amniga<br><br>Maxkamadda darajada 1-aad ee heer degmo iyo heer gobol | Ma jiraan |
| Adeegyada bulshada | Ilaalinta tayada daawooyinka<br><br>Waxbarashada sare ee jaamacadaha, xarumaha cilmibaarista iyo machadyada kale ee tacliinta sare | Xarumaha caafimaadka iyo adeegyada waxbarashada<br><br>Siyaasadaha dowlad-goboleedyada ee barakaca iyo hoyga | Bixinta adeegyada biyaha iyo nadaafadda<br><br>Bixinta adeegyada guryaha iyo hoyga<br><br>Kormeerka bixinta caafimaadka, waxbarashada iyo adeegyada kale<br><br>Taageeridda isku-dubaridka bixinta adeegyada | Siyaasadda caafimaadka iyo waxbarashada qaranka (sida manaahijta) |

### Faa'iidooyinka suurtagalka ah:

- Waxa laga yaabaa in ay noqoto mid siyaasad ahaan shaqeyn kara maadaama ay ugu dhowdahay xaaladda hadda jirta.
- Doorka dowlad-goboleedyada iyo dowladaha hoose ee la badiyey waxaa laga yaabaa inay taageeraan siyaasadaha iyo barnaamijyada ka jawaaba baahiyaha iyo mudnaanta muwaadiniinta.
- Waxay dhiirigelisaa xiriir xooggan ee heerarka dowladda ka dhexeeya maadaama awoodo badani ay wadaag yihiin oo ay u baahan yihiin isu-duwid iyo wada shaqeyn.

## Dhaliilaha suurtagalka ah:

- Waxa laga yaabaa in ay caqabado ka abuurto arrimo muhiim ah sida siyaas-adda arrimaha dibadda iyo doorashooyinka qaranka, kuwaasoo inta badan masuuliyaddooda ay leedahay dowladda dhexe.

- Isticmaalka awoodaha wadaagga ah waxaa laga yaabaa in ay madmadow iyo jahawareer ku abuurto doorarka heerarka kala duwan ee dowladda, taasoo keeni karta khilaaf iyo carqaladeyn dhanka qaadashada go'aannada siyaas-adda.

- Awoodda badan ee dowlad-goboleedyada waxa laga yaabaa in uu hor istaa-go wada shaqeyn ballaaran oo dhex marta hoggaanka Soomaaliya, waxayna dhiirigelineysaa in ay dowlad-goboleedyada raadsadaan in ay si weyn uga madax-bannaanaadaan dowladda dhexe.

## Xulashada 3-aad: Mid daadegsan

Xulashadan, awood qeybsiga dowladda federaalka, dowlad-goboleedyada iyo dowladaha hoose waa isku dheeli tiran yahay.

| | Dowladda federaalka | Dowlad-goboleedyada | Dowladaha hoose | Awoodaha wadaagga |
|---|---|---|---|---|
| **Awoodaha guud** | Siyaasadda arimaha dibadda<br><br>Doorashooyinka qaranka<br><br>Siyaasadda dhulka qaranka | Lagala tashanayaa arrimaha dibadda iyo doorashooyinka qaranka<br><br>Siyaasadda dhulka ee heer dowlad-goboleed | Taageerada maareynta khilaafka dhulka | Doorashooyinka dowlad-goboleedyada iyo dowladaha hoose |
| **Awoodaha dhaqaalaha** | Siyaasadda lacagta<br><br>Qorsheyaasha iyo siyaasadaha dhaqaalaha qaranka<br><br>Uruurinta dakhliga ee saldhigyada cashuuro xaddidan | Horumarinta qorshayaasha dhaqaalaha iyo miisaaniyadaha dowlad-goboleedyada<br><br>Uruurinta dakhliga cashuurta badankeeda<br><br>Nidaaminta qeybaha muhiimka ah, sida beeraha iyo tamarta | Uruurinta dakhliga saldhigyada cashuuraha qaarkood si waafaqsan siyaasadaha dowlad-goboleedyada | Xeerarka ganacsiga dibadda iyo dowlad-goboleedyada dhexdooda |
| **Kaabayaasha dhaqaalaha** | Nidaaminta iyo maamulka gaadiidka cirka iyo badda<br><br>Nidaaminta isgaarsiinta iyo tiknoolojiyadda | Nidaaminta gaadiidka dadweynaha, waddooyinka dowlad-goboleedyada iyo nalalka waddooyinka<br><br>Maareynta xogaha heer dowlad-goboleed | Ma jiraan | Maareynta shabakadaha wadooyinka |
| **Amniga iyo cadaaladda** | Difaaca qaranka, booliska iyo cadaaladda<br><br>Maxkamadda sare iyo maxkamadda dastuurka | Booliiska dowlad-goboleedyada<br><br>Maxkamadaha racfaanka | Isku-xirka arrimaha amniga<br><br>Maxkamadda darajada 1-aad ee heer degmo iyo heer gobol | Booliska degmooyinka<br><br>Maxkamadaha darajada koowaad |
| **Adeegyada bulshada** | Siyaasadda caafimaadka iyo waxbarashada qaranka (sida manaahijta) | Xarumaha caafimaadka iyo adeegyada waxbarashada<br><br>Siyaasadaha dowlad-goboleedyada ee barakaca iyo hooy-siinta | Bixinta adeegyada biyaha iyo nadaafadda<br><br>Bixinta adeegyada guryaha iyo hoyga<br><br>Kormeerka bixinta caafimaadka, waxbarashada iyo adeegyada kale<br><br>Taageerida isku-dubaridka bixinta adeegyada | Hirgelinta adeegyada bulshada ee heer degmo |

### Faa'iidooyinka suurtagalka ah:

- Waxay xulashadan abuureysaa fursad lagu horumarinayo midnimada qaranka iyadoo wax laga qabanayo tabashooyinka ku xeeran awood qeybsiga.
- Waxay xulashadan siineysaa dowladda dhexe awood cad oo ku wajahan arrimaha muhiimka ah ee u baahan siyaasad mideysan, sida siyaasadda arrimaha dibadda iyo horumarinta dhaqaalaha, halka dowlad-goboleedyadana ay hormuud ka noqonayaan bixinta adeegyada bulshada, taasoo ka dhigeysa in ay si fiican ula jaan qaadaan mudnaanta shacabka.
- Waxay xulashadan kor u qaadeysaa iskaashiga iyadoo aan la abuureynin arrimo iskaashi badan oo mugdi iyo jahawareer dhalin kara.

**Dhaliilaha suurtagalka ah:**

- Waxay xulashadan u baahan tahay gorgortan siyaasadeed oo ballaaran, dib-u-heshiisiin iyo kalsooni-dhis, sidaas darteed ma ahan mid siyaasad ahaan hadda muuqata.

# Talooyin tixgelin mudan

In wax laga qabto su'aasha ah awood qeybsiga ma fududa Soomaaliya. Sikastaba ha ahaatee, waxa ay weli muhiim u tahay heshiiska siyaasadda waxayna u baahan tahay in wax laga qabto, iyadoo ay wehlliyaan arrimaha kale ee xasaasiga ah, sida federaalaynta maaliyadda, naqshadda amniga qaranka iyo maqaamka Muqdisho. Tani waxay u badan tahay in lagu gaaro hannaan siyaasadeed loo dhan yahay oo arrimahan si taxadar leh loogu gorfeeyo, aakhirkana lagu daro geeddi-socodka dib-u-eegista dastuurka.

## Xuquuq

Faalladan qotada-dheer waxaa si wadajir ah usoo saaray Somali Dialogue Platform iyo Somali Public Agenda.

Somali Dialogue Platform waa barnaamij Soomaalida ka taageera sidii loo gaari lahaa is-afgarad ku saabsan arrimaha la isku haysto ee siyaasadeed waxaana fuliya Machadka Rift Valley. Somali Dialogue Platform waxaa maalgeliya Foreign, Commonwealth and Development Office (FCDO) ee Boqortooyada Ingiriiska, Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Denmark, iyo Hay'adda Mareykanka u Qaabilsan Horumarinta Caalamiga (USAID). Aragtiyada faallada kama turjumayaan siyaasadaha rasmiga ah ee Dowlada UK, Dowlada Denmark ama Dowlada Mareykanka. Platform-ku wuxuu leeyahay madaxbannaanida tifaftirka warbixinnaddiisa oo dhan.

Somali Public Agenda (SPA) waa hay 'ad aan macaash-doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan. Somali Public Agenda waxa ay wadashaqeyn la leedahay Somali Dialogue Platform.

MachadkaRift Valley wuxuu ka shaqeeyaa bariga iyo bartamaha Afrika si uu usoo saaro aqoon maxalli ah oo loo adeegsan karo horumarinta arrimaha bulshada, siyaasadda iyo dhaqaalaha.

Xuquuqda daabacaadda © Machadka Rift Valley 2022.

Warbixintan waxaa la daabacay iyadoo la adeegsanayo Creative Commons Attribution-NonCommercial-NoDerivatives License (CC BY-NC- ND 4.0).